


FIKRADAH BEENTA AH EE LA XARIIRA UURAYSIGA






FIKRADAH BEENTA AH EE LA XARIIRA UURAYSIGA

XAAWO ILMAHEEDII AYEY NAASKA NUUJINEYSAY MARKA AY SI LAMA FILAAN AH UURKA U QAADAY. MAXAY II LA HAAYEEN DUMARKA WAAWEYNI HADDII ILMAHA NAASKA LA JAQSIIYO UUR LAMA QAADO ? ALA, "MAXAAN WARKOODA U QAATAY ? HADDA UUN BAAN OGADEY INAY BEEN TAHAY." XAAWO WAXAY TAGTAY M.C.HKA OO AY KULA KULANTAY TAKHTAR RUQIYA.




TAKHTAR RUQIYO AYAA KU TIDHI, "HAWENAY KASTA OO QAANGAADH AHI WAY YEELAN KARTAA UUR MARKAA ILMAGALEENKEEDU SAMEEYO UKUN. WAXAY TAASI DHICI KARTA 2 ILAA 3 BILOOD KA DIB MARKA ILMUHU DHASHO, MARKUU SII KORONA WAXAA SII BADANAYSA KHATARTA."


"MARKUU ILMUHU DHASHO, EE HOYADUNA NAASKA NUUJINAYSO, WAXA LAGA YAABAA INANAY CAADO HELIN, LAAKIIN, WAA SUURTAGAL INAY UUR YEELATO."



GABADH KALE OO LAYIDHAAHDO CAASHA AYAA IYADUNA UUR YEELATAY OO LA YAABTAY SIDAY U YEELAN KARTAY, WAAYO WAXAY SAAXIIBADEED U SHEEGTAY IN MAALMAHA DHIIGA XIGA AANAY UUR YEELAN KARIN.



TAKHTAR RUQIYO AYAA KU TIDHI, "MA JIRAAN MAALMO LA BADBAADO BISHA OO DHAN, LAAKIIN WAXA JIRA HABAB KALE OO LA ISTICMAALI KARO SI AANAD UUR U YEELAN SIDA KINIINKA, IUDGA."



XALIIMO OO 45 JIR AH OO UUR YEELATAY.

"MAXAA LA II LAHAA UUR LAMA YEE SHO HADII CAADADU JOOGSATO OO LA WEYNAADO, IMINKA AYAAN OGADEY INAY, BEENTAHAY." XALIIMA AYAA TIDHI.

XALIIMA WAXAY TAGTAY, M.C.H KII WAXANAY KULA KULANTAY TAKHTAR RUQIYO.

XALIIMA WAXAY KU TIDHI TAKHTARADII, "AMMUUR IGA YAABISAY, AYAAN ARKAY."



TAKHTAR RUQIYO, "WAA MAXAY AMMUURTAASI ?"

XALIIMO, "QOF CADADII KA JOOGSATAY UUR MA YEELAN KARAA ?"

TAKHTAR RUQIYO, "DUMARKA QAARKOOD WAXA ISKA TAAGA UUN DHIIGA LAAKIIN UKUNTU WAY SAMAYSANTAA. SIDAA DARTEED, UUR WAAD QAADI KARTAA. SIDA QUDHA EE AAD KU HUBIN KARTAA WAA ADIGA OO LA XIDHIIDHA M.C.HKA."

HADDII AAD TALO WAX KU OOL AH
KA RABTID DHINACA UURKA,
LA XARIIR XARUNTA M.C.H.KA

